



Oggolaanshaha
gelitanka bilaashka ah ee
daryeelahaaga



1800 893 044



www.companioncard.nsw.gov.au





Waa maxay Kaarka Weheliyaha ah (Companion Card)?

Kaarka Weheliyaha waxaa loogu talagalay dadka qaba naafanimu weyn oo joogto ah kuwaas oo leh baahi waarta qofka noloshiisa oo dhan una baahan taageerada daryeelka weheliyaha si ay u tagaan goobaha ugana qaybgalaan munaasabadaha bulshada iyo nashaadyada madadaalada.


Kaarka waxaa la soo bandhigi karaa marka ballan la samaysanayo ama la gadanayo tigidhka looga qaybgalo munaasabadaha iyo goobaha wuxuuna siinayaa haystaha-kaarka tigidh loogu talagalay weheliyahooda.

Yaa xaq u leh kaarka?

Waxaad xaq u yeelan kartaa Kaarka Weheliyaha haddii:

1. aad tahay muwaadin Australiyaan ah ama deggane, kuna nool NSW; iyo
2. aad tahay qof leh naafanimu weyn oo joogto ah; iyo
3. aadan awoodin inta badan inaad ka-qaybgasho goobaha bulshada ama nashaadyada taageerada daryeelka weheliyaha la'aantii; iyo
4. qalabka iyo tiknoolajiyada kale aysan daboolayn baahidaada daryeelka weheliyaha; iyo
5. baahida aad uqabto heerkano ee daryeelka weheliyaha noqon doonto mid noloshada oo dhan ah.

Sida loo codsado kaarka

1.  Ka eeg www.companioncard.nsw.gov.au si aad u daabacdo foomka codsiga ama nuqul daabacan ku codso telefoonka, iimaylka ama boostada.
2.  Ku soo-celi foomka codsiga boostada:
Companion Card
Locked Bag 4028
Ashfield NSW 1800

Macluumaad noocee ah ayaan u baahanahay in aan ku soo daro codsigeyga?

Foomka Codsiga Kaarka Weheliyaha wuxuu ku weydiinayaa:

- » Macluumaadka ku saabsan naafanimadaada
- » Macluumaadka ku saabsan baahidaada daryeel weheliye oo nololashaada oo dhan ah
- » xaqiijinta xirfadlahaaga caafimaadka ama bixiyaha adeegga oo xaqiijinaya inaad buuxisey shuruudaha u-xaq-u-yeelashada ee Kaarka Weheliyaha
- » laba sawir baasaboor midabaysan oo tayo sare leh, oo uu soo saxiixay qofkii xaqiijiyey codsigaaga.

Sidee baan u isticmaalayaa Kaarka Weheliyaha?

Kaarka Weheliyaha waxaa loo isticmaali karaa ka-qaybgalka ganacsiyada, goobaha iyo xarumaha ku yaalla NSW iyo Australia oo dhan.

Adiga ama weheliyahaaga ayaa tusaya Kaarkaaga Weheliyaha markaad ballansanaysid ama iibsanaysid tikidhada laga helo haya'd xiriireed. Xiriiriyuhu wuxuu ku siin doonaa tigidh lacag la'aan ah oo loogu talagalay weheliyahaaga.



Kaarka Weheliyaha waxaa lagu isticmaali karaa dhammaan goobaha ku yaalla dowlad-goboleedka oo dhan.



Taronga
Western Plains Zoo
Dubbo



Rosehill races
Rosehill



The Dish
Parkes



Victoria Park
Sydney

Wixii macluumaad
dheeraad ah



P: 1800 893 044



E: info.companioncard@facns.nsw.gov.au



W: www.companioncard.nsw.gov.au

